

# DEJISAN...



## Barnaamijyada Barashada ee Carruurnimada Hore

Ardayda ka qaybqaata barnaamijyada barashada ee carruurnimada hore waxay u diyaargaroobaan xanaannada—Horumarintu ma ha oo kaliya kobcinta xirfadaha luqadda, akhris-qoraalka iyo xisaabta, laakiin sidoo kale xirfadaha u sahlaya dad la dhaqanka. Dugsiyada Aagga Robbinsdale waxay bixiyaan **xisado Waxbarashada Qoyska ee Carruurnimada Hore (ECFE)** si ay u bartaan oo u ciyaaraan ardaydeena ugu da'da yar iyo waalidkood. Waxaan sidoo kale bixinaa **Barnaamijyada Dugsiga Barbaarinta, Xanaannada Akhriska iyo Qoraalka Qoyska**, iyo barnaamijyada **Tacabiraadda Hore**—fursadaha lagu daboolayo baahiyaha qoys kasta. Wac 763-504-8300 ama booqo [rdale.org](http://rdale.org) wixii faahfaahin ah.



## Baaritaanka Xanaannada

Baaritaanka carruurnimada hore waxa u baahan gobolka Minnesota waxaana la samayn karaa wakhti kasta ka hor inta aanu ilmahaagu billaabin Xanaannada. Baaritaannada billaashka ah waxay siinayaan fursad aad fool-ka-fool ula xidhiidho macalin si aad ugala hadasho waxa ilmahaagu ku fiican yahay, aad u hesho macluumaad ku saabsan degmada iyo ilaha bulshada, oo aad ku waydiiso su'aalo kasta oo aad ka qabto waalidnimada ama dugsiga. Carruurta waxaa laga baaraa aragga, maqalka, hadalka, horumarka dareenka bulshonimo, caafimaadka guud, koritaanka, iyo tallaalada. Baadhitaankan bilaashka ah waa hab fiican oo aad ku heli karto talo ku saabsan la shaqaynta ilmahaaga ka hor Xanaannada si ay u billaabaan billowga ugu fiican ee suurtoogalka ah!

Waxaan **kugula talineynaa in ilmahaaga la baaro da'da 3½** sano si loo ogaado walaacyada suurtagalka ah goor hore.



Ma sugi karno inaan ku soo dhawayno carruurtaada Dugsiyada Aagga Robbinsdale! Hadafkayagu waa inaan dhiirigelino oo aan barno dhammaan ardayda si ay u horumariyaan awooddooda gaarka ah oo ay si togan ugu biiriyaan bulshadooda.  
**Rumee. Lahow. Noqo.**



# Aan u diyaar garowno XANAANNADA!

## Hagaha Qoyska ee Xanaannada ee Dugsiyada Aagga Robbinsdale

Dugsiyada Aagga Robbinsdale waxay siiyaan ilmahaaga fursado gaar ah. Waxqabadyo la taaban karo ee fanka luqadda, akhris-qoraalka, xisaabta, sayniska, farshaxanka, muusigga, caafimaadka, fayo-qabka iyo horumarka jirka waxay ka dhigaan barashada mid madadaalo iyo xiiso leh.

Marka ardaydu bartaan naxariista, yeeshaan saaxiibbo oo ay wada shaqayaan, waxay helayaan xirfadaha ay dhisi doonaan sannad dugsiyeedkooda oo dhan.



# Is DIYAARI...



## Diiwaangelinta Xannaanada

Dugsiyada Aagga Robbinsdale waxay bixiyaan xannaano maalin-buuxda oo lacag la'aan ah oo dhammaan ardayda, siddeed dugsi hoose oo xaafadeed iyo saddex dugsiyada magnet-ka ah. (Dugsiyada Magnet-ku waxay bixiyaan waxbarasho dhamaystiran oo diiradda saaraysa farshaxanka, sayniska, ama qusidda Isbaanishka.) Adeegso dugsi-raadiska bogga internetka si aad u hesho dugsiyada ama aad u codsato dugsi magnetka. Dugsiyada xaafaddaada ayaa lagugu qori doonaa iyadoo lagu salaynayo ciwaanka gurigaaga—tani waa 'dugsiyada aagga ka qaybgalkaaga.' **Ardayda Dugsi Magnet-ka waxaa lagu soo xulaa hab bakhtiyaanasiib ah oo u furan dhammaan dadka deggan degmada. Foomamka diiwaangelinta Xannaanada iyo raadiya dugsi waxaa laga heli karaa khadka tooska ah ee [rdale.org/kindergarten](http://rdale.org/kindergarten).**



## Waxaan Daryeelnaa Carruurta oo aan Dhiirigelinaa Waxbarashada

**TAARIIKHAHA IYO WAKHTIYA KAMA DAMBAYSTA EE MUHIIMKA AH**

Carruurta shan jirsata Sebtembar 1deeda ama ka hor waxay xaq u leeyihiin inay iska diiwaan geliyaan xannaanada sannad dugsiyeedka. **Codsiyada Dugsi Magnet-ku waxa ku egyihiin February. Diiwaangelinta dugsiyada xaafadda waa in la dhammaystiraa xagaaga ka hor. Ka raadi xirmooyinka diiwaangelinta onlaynka [rdale.org/enroll](http://rdale.org/enroll).**

**Disembar:** Codsiyada dugsiyada Magnet-ka ayaa diyaar ah

**Febraayo:** Codsiyada dugsiyada magnet-ka ayaa la filayaa; Foomamka diiwaangelinta dugsiyada xaafadda la heli karaa

**Maarso:** Natijoooyinka bakhtiyaanasiibka dugsiyada Magnet-ka ayaa Lagu Dhawaaqayaa

**Maayo:** Habeenka macluumaadka dugsiyada barbaarinta iyo diiwaangelinta ee dugsiyada xaafadda

**Agoosto-Sibtembar:** Guriga furan ee dugsiyada hoose/habeennada macluumaadka

Markaad diyaar u tahay inaad isdiiwaangeliso, waxaad u baahan doontaa inaad dhammaystirto Baadhitaanka Carruurnimada Hore ee ardaygaaga.

**Waxaad sidoo kale u baahan doontaa:**

- **shahaadada dhalashada ee ardaygaaga**
- **caddaynta cinwaanka guriga**
- **foomka diiwaangelinta K-5 oo la buuxiyay, diiwaannada tallaalka/caafimaadka.**

Xarunta diiwaangelinta, waxaad ka ogaan kartaa basaska iyo gaadiidka; welwelka caafimaadka iyo tallaalka; dheefaha waxbarashada sida qadada bilaashka ah iyo ta la dhimay; iyo qiimaynta luqadda ee Adeegyada Bartayaasha Luqadda Ingiriisiga.

### TALLAALADA

Dhammaan carruurta dhigata dugsiyada waa inay u hoggaansamaan Sharciga Tallaalka Minnesota (MS 121A.15) kaasoo u baahan tallaalkada:

Gawracatada, Teetanada, iyo Xiiqdheerta (DTap, DTP, DT)

Dabeysha (IPV, OPV)

Jadeecada, Qaamo-qashiirta, iyo Rubella-da (MMR)

Cagaarshowga B

Varicella-da (busbus; laba qaddar ayaa loo baahan yahay)

**Ilmahaagu ma awoodi doono inuu aado dugsiyada ilaa uu ka soo baxo shuruudaha sharciga. Waalidiinta/masuuliyiinta waxay heli karaan ka-dhaafitaan sharci ah oo la xiriira sababo caafimaad ama caqiido awgeed.**



## Xarunta Diiwaangelinta

**Taleefon**

763-504-8080

**E-mail**

[enrollment@rdale.org](mailto:enrollment@rdale.org)

**Cinwaanka**

4148 Winnetka Avenue North  
New Hope, MN 55427

**Saacadaha**

Isniin ilaa Khamiis,  
7:30 aroornimo - 3:30 galabnimo  
Jimcaha 7:30 aroornimo - 1:30 duhurnimo



## Habeenka Macluumaadka Xannaanada

Dugsiyada xaafadaha iyo magnetka waxay martigelin doonaan habeennada macluumaadka/guryaha furan bisha May. Dhacdadan, ardayda iyo qoysaskoodu waxay ku soo kormeeri doonaan dugsiyada, la kulmi doonaan maamulaha, heli doonaan liiska agabka dugsiyada, oo ay ogaan doonaan dhammaan waxa laga filayo dugsiyada barbaarinta! Haddii aad rabto inuu joog turjumaan, fadlan hore u wac 763-504-7688. Ka eeg taariikhaha iyo waqtiyada [rdale.org](http://rdale.org)!



## Gaadiidka Baska

Gaadiid waa la siinayaa ardayda haddii:

- Ay ka diiwaangeshan yihiin dugsiyada xaafadooda oo ayna ku nool yihiin meel in ka badan nus mayl u jirta dugsiyada.
- Ay ku nool yihiin degmada oo ayna dhigtaan dugsiyada magnet-ka. Maadaama laga yaabo in ardaydu ka yimaadaan degmada dhan, safarada baska ee lagu tagayo kana imaanaya dugsiyada magnet-ka way ka dheeraan karaan safarada dugsiyada xaafada.



## Daryeelka Naadiga Adfanjarka ee ka hor iyo ka dib dugsiyada

Naadiga Adfanjarku waa barnaamijka daryeelka carruurta ee ka hor iyo ka dib dugsiyada ee Dugsiyada Aagga Robbinsdale. Naadiga Adfanjarku wuxuu furmaa 6:30 subaxnimo wuxuuna xidhaa 6:00 galabnimo. Dhammaan maalmaha dugsiyada, wuuna furan yahay inta lagu jiro xagaaga iyo inta badan fasaxyada dugsiyada. Ardeyda ku jirta barnaamijka waxay ku tababaran doonaan wadajirka inta ay ku hawlan yihiin dhaqdhaqaaq jireed, mashruucyo saynis iyo cunto karin, farshaxan iyo farsamaynta, iyo wakhti dibadda ah. **Wixii macluumaad dheeri ah ama isdiiwaangelinta, fadlan booqo [ced.rdale.org](http://ced.rdale.org)**

